

Somali

U cabashada Ombudsman



COMMONWEALTH
OMBUDSMAN

Ombudsman ka Dawlada dhexe wuxuu baaraa cabashooyinka ku saabsan falalka maamul ee hay'ada Dawladaha Australiya iyo ururada gaarka ah ee qaybaha la aqoonsan yahay.

Siduu kuu caawin karo Ombudsman

Haddii ay kula tahay in si aan caddaalad ahayn laguula dhaqmay, waxaad u caban kartaa xafiiska Ombudsman.

Noocyada cabashooyinka aan baarno waxaa ka mid ah:

- > **wakaaladaha**—masuulka ka ah adeegyada sida samafalka lacag bixinta iyo taageerada carruurta, adeegyada gaadiidka iyo caafimaadka dawlada dhexe.
- > **adeegyada**— ay u bixiyaan badiba qandaraaslayaasha gaarka ah Dawlada Dhexe ee Australiya.
- > **xoriyada Hadalka (FOI)**—oo ay ku jirto dib u dhaca wax ka qabashada codsiyada FOI.
- > **booliiska Dawlada Dhexe ee Australiya (AFP)**—ficilada xubnaha AFP iyo qorshayaasha, iyo waxqabadka iyo nidaamka AFP wakaalad ahaan.
- > **hay'ada Boosta**—Boosta Australiya iyo dadka gaarka ah ee ka shaqeeya kana diiwaangashan Qorshaha Ombudsman ka Hay'ada Boosta (PIO).
- > **caymiska caafimaadka gaarka ah**—xubnaha sanduuqa caafimaadka, sanduuqa caafimaadka, isbitaalada gaarka ah ama aqoon yahanada caafimaadka. Cabashooyinku waa inay ku saabsan yihiin nidaamka caymiska caafimaadka.
- > **ardeyda dibeda**—dhibaatooyinka ku saabsan, ardeyda dibeda ee hore ama kuwa hadda jira ay ku qabaan dugsiyada gaarka ah, machadyada iyo jaamacaddaha Australiya ku yaal.
- > **Australian Capital Territory (ACT)**—falalka maamulka ee Dawlada ACT.

Sidii aad cabasho u sameyn lahayd

La xiriir wakaalada ay khuseyso ee goobta maamusha cabashada marka koowaad si loo xaliyo dhibka. Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabka wakaalada, nala soo xiriir.

Maxaa dhacaya markaad cabasho noo soo gudbiyo?

Waxaan u tixgelinaynaa cabashadaada si taxadar leh iyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Waxaa laga yaabaa inaan ku weydiino macluumaad dheeraad ah, sida warqado ama dukumiintiyo kale, ama inaan ku weydiino inaad cabashadaada qoraal ka soo dhigto.





Nagula soo xiriir

Taleefan

Soo wac **1300 362 072** inta u dhaxeysa
9 subaxnimo (gh) iyo 5 gd (AEDT)
Isniina ilaa Jimcaha.

Interneetka

Gal **www.ombudsman.gov.au**

Qoraal

GPO Box 442, Canberra ACT 2601

Adeegyada la heli karo si ay kaaga caawiyaan inaad cabasho sameyso

Haddii aad tahay qofaan ku hadlin Ingiriiska,
waan ku caawin karnaa anagoo ka adeegsanayna
Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka
(Translating and Interpreting Service (TIS)
131 450). Haddii aad wax ka qabto maqalka,
araga ama hadalka, Adeega TTY ayaa
laga helayaa Adeega Ugudbinta Qaranka
(National Relay Service ee **133 677**).

ADEEGYADA OMBUDSMAN KU WAA BILAASH